Washington State Department of Labor & Industries

Warbixinta Shilka

Tilmaamaha la siiyo Shaqaalaha Dhaawacmay

Marka aad foomkaan ka heshid shaqaalaha xafiiska caafimaad, fadlan buuxi sanduuqyada 1 – 43 koobiga haqaalaha. Isticmaaqalin kuna adkeey warqadda. Waxaan isticmaali doonaa macluumaadka aad bixisid si loo xisaabo manaafacaadka.

1. **Si tafatiran u sharax dhaawaca ku soo gaaray ama xanuunka aad qabtid ilaa inta aad awoodid.** Tusaale ahaan, haddii dhaawaca uu kaa soo gaaaray gacanta sare maxaa yeelay waxaad ku kuftay shaqada, noo sheeg gacanta dhaawaca kaa soo gaaray iyo *sida* kufidda u dhacday. Haddii xaaladaada soo socotay ilaa muddo, noo sheeg waxa ka dambeyay xaaladaada iyo muddada dhibaatada socotay. (Sanduuqa 19a – b)

2. **Na sii *dhamaan* macluumaadka aan codsano** ee ku saabsan shaqadaada, xaaladda qoyska iyo dadka kugu tiirsan. Waxaan macluumaadkaan u isticmaali doonaa xisaabidda manaafacaadkaada.

3. **Na sii ruqsad aan ku galno diiwaanka shaqada ay haayso Waaxda Sugidda Shaqada (Employment Securities Department) (ESD)** si aan u bixino manaafacaadka magta shaqaalaha iyo ku noqoshada adeegyada shaqada. Macluumaadkaan waxaa lala qeybsan kaaraa bixiyeyaasha caafimaadka, bixiyeyaasha dayactirka shaqada, iyo loo-shaqeeyeyaasha. Macluumaadkaan waa qarsoodi, waana la badbaadiyaa sida hoos timaado RCW 50.13.060(13).

4. **Akhri Ogeysiisyada Sharciga ee ku yaal koobiga shaqaalaha foomka ka hor inta aadan saxiixin.**

5. **Ma u baahan tahay in aad kaalmo ka heshid L&I?**

Nambarka Telefoonka Shaqaalaha Dhaawacmay	**1-800-547-8367** (Isniin - Jimco, 8 – 5)
Macluumaadka Sheegashada Laga Dhigay Automaatik	**1-800-831-5227**

Shan shay oo aad u baahan tahay in aad sameysid inta aan ka shaqeyneyno sheegashadaada

1. **Dooro bixiyaha daryeelka caafimaadkaada, kana dooro shabakada bixiyaha caafimaadka L&I**, xataa haddii qof kale uu ku daweyay kaddib marka dhaawaca ku soo gaaray. Waxaad dooran kartaa bixiyeyaasha noocyada soo socda ee shattiga ku haysta daweynta dhaawacaada iyo iskuduwidda daryeelkaada: caafimaadka, xoojinta murqaha iyo lafaha (osteopathic), daweynta kale (naturopathic), ama takhaatiirta cagta; kalkaaliyeyaasha aqoonta sare (ARNPs); takhaatiirta ilkaha iyo baarista indhaha (optometrists). Liiska bixiyeyaasha waxaa laga helaa **www.Lni.wa.gov/FindaDoc**. Waxaad maamulaha sheegashadaada weydiisaa soo celinta kharashka haddii ay waajib kugu noqoto in aad safartid. **Soo celinta kharashka safarka waa in horay loo soo ogolaado.**

2. **Kala hadal loo-shaqeeyehaada fursadaha hawsha fudud** haddii takhtarkaada ku siiyo ogolaasho kuuna sheego waxyaabaha kaa reeban ee la xariira shaqada. Inta badan shaqaalaha dhaawacan waa shaqeyn karaan iyaga oo qaata mushaar buuxa maxaa yeelay loo-shaqeeyeyaasha waxay awood u yeelan ***karaan*** in ay wax ka baddalaan waajibaadkooda inta ay ka soo raysanayaan. Ama, L&I waxay kabbi kartaa lacagaha la dhimay ee la xariira boos ka duwan. (Xasuus: Lacagaha waqtiga-lumay ***in badan*** ayay ka yar yahiin dakhliga kaa soo gala shaqada.)

3. **Ha bixinin biilasha caafimaadka ama dawooyinka la qoro** ee la xariira dhaawacaada. Haddii farmashiistaha kaa dalbado in aad bixisid, haayso resiidka kaddibna weydii L&I in ay kuu soo celiyaan

kharashka haddii laguu ogolaado sheegashadaada.

4. **Soo dhaweyso nambarka sheegashadaada** kuna soo qor dhamaan warqadaha aad noo soo dirtid. Nambarkaan waxaa laga helaa Koobiga Shaqaalaha, dhanka hoose geeska midig foomka. Kaarka wuxuu muujiyaa: "Kani waa nambarka sheegashadaada."

5. **U qor maamulaha sheegashadaada haddii aad guurtid ama aad baddashid bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka.** Waa in aad qortid iyo saxiixdid isbaddalada. Xasuuso in aad ku kor qortid nambarka sheegashadaada.

   U dir: Department of Labor & Industries
   PO Box 44291
   Olympia WA 98504-4291.

Saf-Saf Tilmaanta Warbixinta Shilka

Qeybtaan waxaa ku jira tarjamada calaamadaha ku yaal sanduuqyada 1 - 43 foomka. Meesha aysan caddeyn waxa loo baahan yahay in jawaaabtaada ahaato, waxaan ku darnay tilmaan. Hubso in aad jawaabtaada ku qortid foomka, MAYA in aad ku qortid warqadaan.

Macluumaadka Shaqaalaha:

Doorashada luqadda - Noo sheeg luqadda aad jeceshahay in aad u adeegsatid isgaarsiinta adiga oo calaameeya sanduuqa ku xiga. Haddii aadan arkin luqadaada, calaamee sanduuqa ugu dambeeyo ee ku calaameysan Wax Kale kaddibna luqadda aad jeceshahay ku qor xariiqanta korkeeda.

1. Magaca - Kowaad, Dhexe, Dambe. Isticmaal magacaada sharciga oo buuxa.
2. Jinsiga - Calaamee Lab ama Dhedig.
3. Nambarka Soshal Sekuritiga.
4. Nambarka telefoonka guriga.
5. Taariikhda dhalashada - qaabka bil/maalin/sannad.
6. Cinwaanka guriga - ku dar magaalada, gobolka, iyo nambarka xaafadda (zip code).
7. Joogga - oo cag iyo inji ah.
8. Miisaanka - oo bound ah.
9. Cinwaanka Warqada (haddii uu ka duwan yahay cinwaanka guriga) - ku dar magaalada, gobolka, iyo nambarka xaafadda (zip code).

Macluumaadka dadka kugu tiirsan:

Waxaa dhici karto in lagu weydiiyo in aad muujisid caddeynta guurka, diiwaan gelinta dadka wadaaga nolosha guriga, ama xaq u yeelashada dadka kugu tiirsan.

10. Xaaladda qoyska: calaamee sanduuqa ku quseeyo adiga.

Tiirka Bidix	Tiirka Midig
Guursaday	Xaaska Laga Dhintay
Kala tagay	Keli
Is furay	
Qofka Lala Wadaago Nolosha Guriga ee ku jira Diiwaanka	

11. Caruurta ku tiirsan - ku dar cunugga aan dhalanin iyo qiyaas ahaan taariikhda dhalashada la filaayo. Manaafacaadka waxay, qeyb ahaan, ku saleysnaan doonaan tirada caruurta sharci ahaan kugu tiirsan. Haddii aadan haysanin haynta sharciga, buuxi Sanduuqa 13.

    Bixi magaca buuxa ee qof kasta oo kugu tiirsan; xariirka aad la leedahay; iyo haynta sharciga - calaamee sanduuqa kowaad haa ama calaamee sanduuqa labaad maya haddii aadan haysanin haynta sharciga; iyo waxaad bixisaa taariikhda dhalashada qof kasta oo kugu tiirsan.

12. Magaca qofka aad is qabtaan ama u diiwaan gashan sida qofka aad la wadaagtid nolosha guriga.

13. Magaca iyo cinwaanka ilaaliyaha sharciga caruurta - ku dar magaalada, gobolka, iyo nambarka xaafadda (zip code).

Macluumaadka Dhaawaca:

14. Taariikhda Dhaawaca ku soo gaaray ama hawshii ugu dambeysay aad ku sigaty. Isticmaal qaabka bisha/maalinta/sannadka.
15. Waqtiga dhaawaca ku soo gaary - Qor waqtiga kaddibna calaamee sanduuqa kowaad subaxnimada (a.m.) ama calaamee sanduuqa labaad marka ay tahay galabnimada (p.m.)

16. Shiftiga (calaamee hal) - Calaamee sanduuqa kowaad xagga shiftiga maalinta; calaamee sanduuqa labaad haddii shiftiga isbadbaddala; ama calaamee sanduuqa saddaxaad xagga shiftiga habeenka.
17. Weligaa ma lagaa daweeyay isla xaaladdaan ama mid la mid ah? Calaamee sanduuqa kowaad haa ama sanduuqa labaad maya.
18. Dhacdo khaas ah miyaa sababa u ah xaaladaan? Calaamee sanduuqa kowaad haa ama sanduuqa labaad maya.

19a. Qeybaha jirka uu dhaawaca soo gaaray ama sigtay.

19b. Si tafatiran u sharax sida dhaawacaada u dhacay ama sida aad u sigatay. (Ku dar qalabka, mashiinada, kiimikada ama qiiqa laga yaabo in uu ku lug leeyahay.)

20. Ma waxaad sameyneysay shaqo caadi ah? Calaamee sanduuqa kore haa ama sanduuqa hoose maya.
21. Xaggee ayuu dhaawaca ama ku sigashada ka dhacday? Calaamee sanduuqa kowaad marka lagu sugan yahay xerada loo-shaqeeyaha; calaamee sanduuqa labaad marka lagu sugan yahay goobta shaqada; calaamee sanduuqa saddaxaad marka lagu sugan yahay meelaha kale kaddibna waxaad goobta ku qortaa meesha lagu siiyay.
22. Xaggee ayuu dhaawaca/sigashada ka dhacday? Magacaaw ganacsiga. Qor cinwaanka ganacsiga kuna dar magaalada, dagmada, gobolka iyo nambarka xaafadda (zip code).
23. Dhaawaca uu ka dambeeyo mashiin cillad qaba, shay ama qof aan ahayn loo-shaqeeyeheyga ama shaqaalaha lala shaqeeyo? Waxaad sanduuqa kowaad ku calaameysaa haa, sanduuqa labaad maya, ama sanduuq saddaxaad suurtogal.
24. Qor liiska maragta - Qor magacyada dadka arkay dhaawaca marka uu ku soo gaaray.
25. Goorma ayaad ku soo noqon doontaa shaqada? Geli taarooljda qaabka bisha/maalinta/sannadka.
26. Goorma ayay ahayd shaqadii kuugu dambeysay? Geli taarooljda qaabka bisha/maalinta/sannadka.
27. Loo-shaqeeyehaada ma u sheegtay dhacdada? Calaamee sanduuqa kowaad haa ama sanduuqa labaad maya. Haddii ay haa tahay, qor magaca iyo mansabka qofka.
28. Taariikhda aad soo sheegtay. Geli taarooljda qaabka bisha/maalinta/sannadka.
29. Maalinta dhaawaca ku soo gaaray, ma lahayd manaafacaadka daryeelka caafimaadka uu bixiyo loo-shaqeeyaha? Calaamee sanduuqa kowaad haa ama sanduuqa labaad maya.

Macluumaadka Shaqada:

30. Magaca ganacsiga loo-shaqeeyahaada.
31. Nooca ganacsiga.
32. Ilaa intee ayaad ka shaqeysay meeshaas? Waad qiyaasi kartaa. Waxaad qiyaasta tirada sanooyinka gelisaa meesha kowaad ee banaan; ama bilaha meesha labaad ee banaan; ama todobaadyada meesha saddaxaad ee banaan; ama maalmaha meesha afaraad ee banaan.
33. Nambarka telefoonka loo-shaqeeyaha. Geli nambarka kuna dar nambarka lagu galo deegaanka.
34. Cinwaanka loo-shaqeeyahaada. Ku dar magaalada, gobolka, iyo koodkaa lagu galo deegaanka (zip code).
35. Qor mansabka shaqadaada iyo sharax waajibaadkaada shaqada.
36. Mushaarka aad ka qaadaatid shaqadaan. Geli xisaabta meesha ku xigta calaamadda doolarka. Calaamee hal mushaar oo keliya:

Tiirka Bidix	Tiirka Midig
Saac	Todobaad
Maalin	Bil
In ka badan 1 mushaar	

37. Saac halkii maalin. Bixi tirada saacadaha lagu ballamiyay in aad shaqeysid maalin kasta.
38. Maalmo halkii todobaad. Bixi tirada maalmaha lagu ballamiyay in aad shaqeysid todobaad kasta.

39. Dakhliga dheeraadka ah (maalintii marka leysku celceliyo). Geli xisaabta meesha ku xigta calaamadda doolarka. Calaamee nooc kasta dakhliga dheeraadka ah ee lagu dabaqi karo:

Tiirka Bidix	Tiirka Midig
Shaqo gaaban	Talooyin
Waqtiga dheeraadka ah	Lacagaha dheeraadka ah ee lagu bixiyo saacadaha ka baxsan shiftiga
Khidmadda	Gunnada 12dii bil ee la soo dhaafay

40. Intee shaqo mushaar laga qaato ayaad haysaa?
41. Aniga waxaan ahay: Calaamee dhamaan sanduuqyada laguugu dabaqi karo adiga

Tiirka Bidix	Tiirka Midig
Milkiilaha	Dadka Hantida Gashtay Shirkadda
Shirko	Agaasimaha Shirkadda
Sarkaalka Shirkadda	Ceymiska Leyska Dhaafi Karo
	Ima quseeyso

42. Saxiixa - Xasuus: Hoos ka akhri ogeysiisyada sharciga. Kaddib marka aad saxiixdid, qor taariikhda adiga oo isticmaala qaabka bisha/maalinta/sannadka.

    Waxaan caddeynaa in wararkaan ay yahiin run ilaa inta aan ogsoonahay oo aan aaminsanahay. Marka aad saxiixdid foomkaan, waxaan bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka, isbitaalada, ama kliinikada u ogolaaday in ay Waaxda Shaqada iyo Warshadaha (Department of Labor and Industries) siiyaan warbixinta caafimaadka muhiimka ah, kuwa ay iyaga ama dadka kale soo saaraan.

43. Saxiixa. Kaddib marka aad saxiixdid, qor taariikhda adiga oo isticmaala qaabka bisha/maalinta/sannadka.

    Waxaan u ogolaaday Waaxda Shaqada iyo Warshadaha (Department of Labor & Industries), ama dadka kale oo magacooda ku shaqeysta, in ay diiwaanka qarsoodiga shaqada ka helaan Waaxda Sugidda Shaqada (Employment Securities Department) (ESD) si loogu kaalmeeyo helitaanka manaafacaadka magta shaqaalaha.

Ogeysiisyada Sharciga

RCW 51.36.060 waxay bixisaa: Dhamaan macluumaadka caafimaadka ee ku jiro milkiyada ama kantaroolka qof lana xariira dhaawac khaas ah sida waaxda qabto iyo quseysa shaqaale kasta oo dhaawaciisa ama cudurka shaqada ka soo gaary ay aasaas u tahay sheegashada sida hoos timaado qeybtaan, waa in la heli karo marxalad kasta ay mareyso dacwadda loo haysto loo-shaqeeyaha, wakiilka sheegtaha, iyo waaxda kaddib marka la codsado, mana dhici doonto in qof loo qabsado sababta loo bixiyay macluumaadka noocaas ah.

Qeybta hoose RCW 51.48.020 (2) waxay leedahay: Qof kasta oo sheegta manaafacaad sida hoos timaada qeybtaan, oo si ula kac u bixiya macluumaad been ah oo looga baahan yahay sheegasho kasta ama arji kasta sida hoos timaado qeybtaan wuxuu ahaan doonaa dambiile galay dambi culus, ama dambi dhexe sida waafaqsan xatooyada iyo qodobada Qeybta 9A RCW.

Kashifaadda Nambarka Soshal Sekuritigaada Foomkaan, lagaama rabo in aad sheegtid nambarka Soshal Sekuritigaada. Hase ahatee, nambarka wuxuu L&I ku kaalmeyn doonaa in ay ka shaqeyso sheegashadaada sida hoos timaado sharciyada ceymiska warshadaha. [Fiiri Qeybta 51, Xeerka La Baddalay ee Washington (Title 51, Revised Code of Washington) iyo Cutubka 51.28 RCW (Chapter 51.28 RCW.)]

RCW 50.13.060 (13): Qof kasta ama urur kasta uu cutubkaan u ogol yahay in uu galo balse si qaldan u isticmaalo ama fasax la'aan kashifo diiwaanka ama macluumaadka waxaa qofkaas ama ururkaas lagu qaadi doonaa ciqaabta madaniga oo ah shan kun doolar iyo cunaqabadeen kale oo lagu dabaqi karo sida hoos timaado sharciga gobolka iyo federaalka. Dacwadda lagu hirgelinaayo qeybtaan waxaa soo jeedin doono xeer ilaaliyaha guud, kaddibna xisaabta laga soo aruuriyo ciqaabta waxaa lagu shubi doonaa maaliyadda lagu bixiyo lama filaanka maamulka waaxda sugidda shaqada. Xeer ilaaliyaha guud wuxuu dalban karaa soo celinta kharashka ku baxa khidmadaha qareenka xagga dacwad kasta oo la soo jeediyo si loo hirgeliyo qeybtaan.

RCW 50.13.015: Haddii sharciyada gobolka ama federaalka u aqoonsadaan macluumaadka ay wakaalad kale oo ka tirsan dawladda siiso waaxda in uu yahay gaar iyo qarsoodi, waaxda ma bixin karto macluumaadka noocaas ah.

Sida loo helo kaalmo la xariirto sheegashadaada L&I

Na soo wac: **Nambarka Shaqaalaha Dhaawacmay 1-800-547-8367 (Isniin - Jimco, 8 – 5)**
Macluumaadka Sheegashada Automaatigga 1-800-831-5227
Adeegyada Itaal Darrida TDD Maqalka/Hadalka 1-360-902-5797

Gal internetka: **Bogga internekta L&I: www.Lni.wa.gov**

Ogaaw sida aan uga shaqeyno sheegashada, waxa magta shaqaalaha daboosho, sida aan u xisaabno manaafacaadka, waxa looga baahan yahay in loo-shaqeeyehaada bixiyo, iyo in kale oo badan.

Ma u baahan tahay in lagaa kaalmeeyo farsamada boggena internetka?

- *Email:WebSupport@Lni.wa.gov*
- *Telefoon: 360-902-5999*

Ama waxaad wici kartaa ama waxaad booqan kartaa xafiiska goobaha dibadda L&I.
Waxay ku qoran yahiin buugaada telefoonka meesha hoos timaado WA State, Labor & Industries.

Aberdeen 360-533-8200	Everett 425-290-1300	Mount Vernon 360-416-3000	Spokane 509-324-2600	Tumwater 360-902-5800
Bellevue 425-990-1400	Kennewick 509-735-0100	Sequim 360-417-2700	Tacoma 253-596-3800	Vancouver 360-896-2300
Bellingham 360-647-7300	Longview 360-575-6900	Silverdale 360-308-2800	Tukwila 206-835-1000	Yakima 509-454-3700
East Wenatchee 509-886-6500	Moses Lake 509-764-6900	Pullman 509-334-5296		